**Codso Sanduuqa Caddaaladda Deegaanka ee Seattle**

Xafiiska Joogteynta & Deegaanka Seattle (OSE) wuxuu ku faraxsan yahay inuu ku dhawaaqo in Sanduuqa Caddaaladda Deegaanka uu **hadda aqbalayo codsiyada.** Sannadkan, waxaa jira laba ikhtiyaar oo maalgelineed oo la heli karo. Doorashada koowaad waxay bixisaa deeqo u dhexeeya $10,000 ilaa $40,000, iyada oo wadarta maalgelinta ah $250,000. Doorashada labaad waxay bixisaa deeqo u dhexeeya $40,001 ilaa $90,000, iyada oo wadarta maalgelinta ah $750,000. Lacagahan ayaa ah in lagu taageero mashaariicda faa'iido u leh bulshooyinka ay sida aadka ah u saameeyeen sinnaan la'aanta deegaanka iyo cimilada, oo ay ku jiraan Black, Asaliga, Dadka Midabka ah, soogalootiga, qaxootiga, shakhsiyaadka dakhligoodu hooseeyo, dhalinyarada, iyo odayaasha. **Xilliga kama dambaysta ah ee codsigu waa 5pm (PT) Arbacada, Luulyo 26.**

Fursadan maalgelineed waxay u furan tahay Qabaa'ilka iyo ururada qabaa'ilka, ururada aan faa'iido doonka ahayn, iyo kooxaha bulshada kuwaas oo la shaqeeya bulshadooda si ay u horumariyaan deegaanka iyo caddaaladda cimilada. Noocyada mashaariicda waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn fanka iyo wada-sheekeysiga, waxbarashada bulshada, dhisidda awoodda ururka iyo bulshada, u-diyaargarowga isbeddelka cimilada, dhisidda xirfadaha iyo tababarrada la xiriira shaqooyinka cagaaran*, iyo qorsheynta bulshada iyo aragtida.

Haddii aad xiisaynayso inaad wax badan ka ogaato Sanduuqan, ka doodista fikradda mashruuca, ama soo gudbinta soo jeedin, waxaad qaadi kartaa tillaabooyinka soo socda:

- Iska diiwaan gali **halkan**wicitaan 20-daqiiqo ah xubin ka mid ah kooxdayada
  - *Fadlan isticmaal foomka si aad u codsato tarjumadan.*

- Ka qaybgal kulan macluumaad oo fogaan arag ah.
  - Arbacada, Juun 21, 12-1:30 galabnimo - halkan iska diwaangeli
  - *Fadlan noogu soo dir equityenviro@seattle.gov si aad u codsato turjubaan xili hore.*

- Ka qaybgal kulanka macluumaadka shakhsi ahaan:
  - Talaado, Juun 27, 6-7:30 galabnimo - halkan iska diiwaan geli
  - **Goobta:** Maktabadda Dadweynaha ee Xaafada Columbia, Qolka Kulanka Columbia
    - 4721 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118
  - *Fadlan noogu soo dir equityenviro@seattle.gov si aad u codsato turjubaan xili hore.*

Waxaan sidoo kale diyaar u nahay inaan su'aalaha uga jawaabno iimaylka *equityenviro@seattle.gov* . Booqo **seattle.gov/environment/ejfund** si aad wax badan uga barato oo aad u codsato.

* Ujeedada Sanduuqa EJ, shaqooyinka cagaaran waxaa lagu qeexaa inay yihiin shaqooyin ujeedadoodu tahay in wax laga qabto ama lagu yareeyo saameynta isbedelka cimilada